

**DUGSIYADA DOWLADA SEATTLE  
SHARDIGA QALIN-JEBINTA DUGSIGA SARE  
Fasalka 2012**

**AGASIMAYASHA GUDIGA**  
Peter Maier, District I  
Sherry Carr, District II  
Harium Martin-Morris, District III  
Michael DeBell, District IV, President  
Kay Smith-Blum, District V  
Steve Sundquist, District VI, Vice President  
Betty Patu, District VII

**Kormeeraha Guud**  
Dr. Maria Goodloe-Johnson

**Si aad u qalin jabiso, una hesho shahaadada waxaa lagaa doonayaa in aad haysato lixda arimood ee hoos ku yaal:**

**1. DHICAHA UGU YAR WAA 20**

Ka fiiri boga labaad sida ay u kala baxsan yihiin dhibcahaasi. Dhibcaha layska doonayo waa kuwa ugu yar marka loo eego wadarta fasalada qalin jebinta iyo dhibcaha maadooyinka oo kala duwan. Si aan ugu diyaar garowno arimahan iyo jaamacadaba, waxa dhistarigu ku dhiirigelinayaa ardaydu in aya qaataan maadooyin ka badan kuwa looga baahan yahay. Dugsiyada qaar ka mid waxay ardayda ku xidhaan dhibco ka badan 20ka dhibcood in lagu qalin jebiyo. Kala xidhiidh koonsulaarka iskuulkaaga dhicbaha layska rabo

**2. ISKU CELCELINTA DHIBCAHA BUUNDADA WAA 2.0**

Ardayda Dugsiyada Dowlada Seattle waa in ay haystaan 2.0 ama wixii ka sareeya isku celcelinta buundada iyo 2.0 ama wixii ka badan fasalada muhiimka ah (sida maadooyinka Ingriisiga, xisaabta, taariikhda, iyo sayniska). Eeg siyaasada u qoran Gudiga Iskuulka 15.00

**3. IMTIXAANKA GOBOLKA-IMTIXAANKA QIIMAYNTA AQOONTA ARDAYDA DUGSIGA SARE (OO LA ORAN JIRAY WASL)**

Ardaydu waa inay ku gudbaan akhriska iyo qoraalka imtixaanka gobolka ama bedel loo ansixiyo ama loo casriyeeyo adeega waxbarashada khaaska ah si ay u qalin jebiyaan. Ardaydu waa inay isku dayaan imtixaanka xisaabta gobolka. Hadii uu gudbi waayo waa inuu kasbadaa 2 kiridhit oo xisaab ah kadib fasalka 10aad. Maadada xisaabta waa inuu ka gudbaa si uu ugu qalmo shardigan. Ardaydu waa inay wadaan isku daya gudbida xisaabta imtixaanka gobolka ama loo ansixiyaa wax u dhigma(SAT,ACT,AP – maadooyinka oo dhan. Akhriska iyo qoraalku waa cadayn ururis oo keliya).

**4. DHAMAYSTIRKA MASHRUUCAN**

Gobolku waxa uu ardayda ka doonayaan in ay dhamaystiraan qorshaha arimahan oo dhan si ay u helaan shahaadada dugsiyada sare. Ardaydu waa in ay soo bandhigaan aqoontooda wax akhris, qoraal, wax-alif, iyo joogtayta aqoontaas. Waxa laga yaabaa in ardayda la weydiiyo in ay qoraan warqad cilmi baadhis ah iyadoo ay la shaqaynayaan caawiyayaal jooga iskuulada ama jaaliyada, markaana u soo gudbiyaan jaaliyada ama koox gudi oo jooga iskuulada. Waxay ardaydu soo ururinayaan macluumaadkii ay ka heleen cilmi baadhista oo ay u soo ururinayaan sidii boortafooliyo. Ikuuladuna way ku kala duwan yihiin sida loo samaynayo boortafooliyahan

**5. DUGSIGA SARE IYO WIXII KA DAMBEEYA**

Gobolku waxa uu doonayaa in ay ardaydu si fiican u gutaan howlaha dugsiyada sare una diyaar-garoobaan waxbarashada ka dambeysa dugsiyada sare. Dugsiyada Dowlada Seattle waxa ay u diyaarisay ardayda gelaya fasalka 9aad qorshe 5 sano ah oo 4 sano oo ka mid ah tahay afarta uu dugsiyada sare ku jiro iyo sanad ah sanadka u horeeya jaamacada. Si gaar-gaar ah ayaa konsulaarka iskuulku uga caawinayaa ardayda. Wixii akhbaar ah ee dheeraad waxaad ka helayaas:

<http://www.k12.wa.us/GraduationRequirements/Requirement-HighSchoolBeyond.aspx>.

**6. SHAQO BARASHO**

Dugsiyada Dowlada Seattle waxay ardayda ka doonaysaa in ay sameeyaan 60 saacadood oo shaqo barasho ah in taanay qalin-gebin waxaana loogu talagalay in ardaydu adeegsadaan xirfadooda iyo aqoontooda eek u aadan noloshu dhabta ee jirta. La xidhiidh iskuulkaaga maadaama ay iskuulada ku kala duwan yihiin arimahan

**DUGSIYADA DOWLADA SEATTLE  
SHARDIGA U YAR EE DUGSIGA SARE LAGA QALIN-JEBIYO**

MAADO	DHIBCO <sup>1</sup>	KORSOYINKA SHARDIGA AH	XUSUUSNOW
Ingiriisi/ Luqada	3.0	Luqada Ingiriiska 9A, 9B, 10A, 10B, 11A	Ingiriisigu/Ingiriisku kuma koobna oo keliya akhriska, alifka qoralka, suugaanta, hadalka, iyo masraxa.
Taariikhaha	3.0	Tariikhda Aduunka 1, 2, 3  Tariikhda Maraykanka 11A, 11B  Dowlada iyo Dhaqalaha Maraykanka	Hal dhibic ama derajo ayaa looga baahan yahay fasalka taariikhda iyo dowlada maraykanka, waxaana la bartaa dastuurka maraykanka. Dhibic badhkeed baa looga baahan yahay fasalka taariikhda iyo dowlada Gobolka Washington. Hal dhibic baa looga baahan yahay

		12 Tarikhda Gobolka Washington & Dowlada	taariikhda, juquraafiga, dhibatooyinka ka taagan hada aduunka. Waxa kale oo korsooyinka ka mid ah dhaqaalaha, waxbarashada aadamiga, cilmiga bulshada, culuunta siyaasada, xidhiidhka caalimiga ama koorsooyinka la xiriira oo lagu xoojinayo dhibaatooyinka ka taagan aduunka oo distarigu aqbali karo sida kuwa kor ku xusan. Sharcigiisuna waa WAC 180-51-075. Ardaydu waa in lagu sameeyo qiimayn ku saabsan cilmiga bulshada iyada oo lagu salaynayo fasalkooda 11aad iyo 12aad.
Xisaabta		Ka dooro madoyinka la ogol yahay ee la bixinayo <sup>4</sup>	Koorsooyinka la dooranyo waa in la siman yihiin kuwa laga rabo fasalaa 9aad iyo 10aad.
Sayniska	2.0	Ka dooro madoyinka la ogol yahay ee la bixinayo	“labada darajo ama dhibcood ee sayniska waa in uu mid ahaado saynis shaybar wata WAC 180-51-060.
Barashada Shaqada	1.5	Ka dooro madoyinka la ogol yahay ee la bixinayo	Dhibcaha waxbarashada shaqada waxa ku jiri kara baadhis ama qabanqaabin fasalada xirfada iyo farsamada ama kuwa la ogol yahay. Wixi fahfahin ah la xidhiidh consularka iskuulkaga.
Jimicsi/Cafimad iyo Jirdhis	2.0	Ka dooro madoyinka la ogol yahay ee la bixinayo 1.5 Waxbarashada Jirdhiska .5 Caafimaadka	Fulinta qaybaha (waxbarashada jirdhiska) waxa looga tanaasuli kara sababo khaas ah awgood sida curyaanimo ama ka qaybagal ciyaarokale. Arinto si kastaba ha ahaatee, Ardaygu waa inuu helaa aqoonta uu u baahanyahay ee maadada jir dhiska ama qaato maadada jimicsiga ama uu dhamaysto OSPI hore u marinta xaalada caafimaadka. RCW 28A.230.50; WAC180-50-135; WAC392-410-136; WAC392-410-310; iyo WAC392-410-340. Ardaygu waa inuu dhameeyo hore u marka xaalada caafimaad ee OSPI xiliga dugsiga sare.
Fan Farshaxan	1.0	Farshaxank, Musikada ama Masraxa	Ka dooro korsooyinka fanka, muqalka iyo samaynta farshaxanka
Doorasho	5.5	Luqada Aduunka iyo/ama madoyinka laga dooranayo kuwa kale	
ISUGEYNTA DHIBCAHA	20.0		Faylka rasmiga ee Gobolka WA wuxu tusayaa rikoodhka kalasyada la qaatay, dhibcaha iyo fasalka.

- Hal dhibic waxay la mid 150 saacadood oo waxbarasho ama dhamaystirka koorsooyin kale oo la ogol yahay. (WAC 180-51-050). Koorsooyinkaas la ogol yahay waxay qoran yihiin buuga wax liis garaynta maadooyinka dugsiga sare ee Dugsiyada Dowlada Seattle
- Ardayda dhamaysted kuna baasay taariikhda gobolka tan dowlada loogama baahna in ay qaataan taariikhda Washington. Barashada Dastuurka Maraykanka iyo Gobolka Washington lamaga tegi karo sida uu sharciga RCW 28A.230.170, laakiin way qaadan karaan koorsooyinka kale ee u dhigma oo uu ogol yahay digtoorka iskuulka. Taas waxa dheer, ardayda fasalada 11aad iyo 12aad ee ka soo bedeshay gobol kale ee haystey 2 derajo ee maadada taariikha ee lagu qalin jebinayo, waxa laga yaabaa in laga daayo taariikhda Gobolka Washington.
- Laga bilaabo sanad dugsiiyeeda 2013**, ardayda waxa looga baahanyahay inay kasbadaan saddex kiridhit oo xisaab ah oo ay kujidho Algebra 1, Geometry iyo fasal saddexaad xisaab ah oo adag ( Algebra II, Pre-calculus, Calculus, Statistics, Advanced CTE, iwm).
- 4.Ugu yaraan hal maado oo CTE ayaa u gelaya kiridhitka 3aad ee xisaabta. Maadooyinka u qalmaanna TBAda. Fadlan kala tasho la taliyahaaga dugsiga.

TAXADAR: Aadista jaamacad 4 sano ah, waxa loo baahan yahay koorsooyin ka badan kuwa lagu qalin jebinayo. Waxa kale oo dheer koorsooyin shaqo iyo qaadasahada imtixaanka u diyaargarowga jaamacada ee SAT ama ACT iyo weliba isku celcelin buundooyinka inta aad heshay. Ka hubi liiska jaamacadaha iyo kosulaarada dugsiyada sare wixii akhbaar dheeraad ah. Kolojyada labada sano uma baahna koorsooyinka dheeraadka ee aan kor ku soo sheegnay. Si kastaba ha ahaatee, waxa xaqiiqa ah in ardayda ku qaata maadooyinka adadag dugsiga sare ay ka jaanis fiican xaga doorasahada jaamacadaha kuwa kale.

Wixii akhbaar ah iyo su'aalo ah ee la xidhiidha qaadasha kalaasyo jaamacada iyaga oo weli ku jira dugsiga sare, ama wax ku barashada guriga, ama waxbarashada santariska, dhibcaha fasalada, iyo maadooyinka laga tanaasuli karo waxaad kala xidhiidhaysaa konsulaarka iskuulkaaga.